

# Gunnada Kaydka Dugsiga (School Saving Bonus)

**Macluumaadka loogu talagalay waalidiinta iyo xannaaneeyayaasha ardayda dhigata dugsiyada dawladda**

## Ku saabsan Gunnada Keydka Dugsiga (School Saving Bonus)

Dawladda Victoria waxay nolosha u fududeynaysaa qoysaska iyadoo siinaysa \$400 oo ah Gunnada Keydka Dugsiga (School Saving Bonus).

Taageeradani waxay ka caawin doontaa inay ku dabaraan kharashka dharka dugsiga, buugaagta, iyo hawlaha dugsiga sida kaamamka, dalxiisyada iyo ciyaaraha.

Gunnada Keydka Dugsiga (School Saving Bonus) waxay siyaado ku tahay caawimaada hadda la heli karo ee socota ee la tijaabiyay faaiidadeeda isla markaasna loogu talagalay Kaamamka, Ciyaaraha iyo Dalxiiska (Camps, Sports and Excursions Fund - CSEF) iyo Barnaamijka Labiska Dugsiga ee La-awoodi-karo.

Gunnada Kaydka Dugsiga (School Saving Bonus) waxa la siin doonaa dugsiyada iyo qoysaska teeramka 4, 2024.

## Yaa qaata Gunnada Keydka Dugsiga (School Saving Bonus) dugsiga

Gunnada Kaydka Dugsiga (School Saving Bonus) waxaa sanadka 2025 heli kara waalidiinta iyo xannaaneeyayaasha dhammaan ardayda dhigata dugsiyada dawladda Victoria laga bilaabo Udiyaarinta (Prep) ilaa Sannadka 12, marka laga reebo ardayda caalamiga ah ee lacag-buuxda wax ku barta, ardayda guriga wax ku bartay, ardayda TAFE iyo ardayda sanadka 2025 dhigata dugsiga barbaarinta carruurta.

## Tallaabooyinka looga baahan yahay waalidka iyo daryeelayaasha inay qaadaan

Waalidiinta iyo daryeelayaasha carruurta buuxiyay shuruudaha kor ku xusan ee u qalmitaanka Gunnada Keydka Dugsiga (School Saving Bonus) waxaa looga baahan yahay inay sameeyaan waxyaabaha soo socda **Jimcaha 18-ka Oktoobar 2024**:

- **Dhameystir diiwaangelinta**

Haddii ilmahaagu, ama carruurtaadu ay badalanayaan dugsiga dawladda Teeramka 1 2025, ama ay bilaabaya U diyaargarowga (Prep) ama Sannadka 7 sanadka 2025, fadlan dhameystir is-diiwaangelinta. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka akhriso [Iska-diiwaangelinta Dugsiga](#).

- **Hubi macluumaadka xiriirka**

Hubi in macluumaadkaaga xidhiidhka ee ay dugsigu heystaan inuu yahay mid sax ah. Waxaad ku hubin kartaa macluumaadkan adiga oo si toos ah ula xidhiidhaya dugsigaaga.

## Helida \$400 ee Gunnada Keydka Dugsiga (School Saving Bonus)

Uma baahnid inaad codsato Gunnada Keydka Dugsiga (School Saving Bonus).

Waxda Waxbarashada ayaa iimayl kuu soo diri doonta Nofeembar 2024 oo ay la socoto \$400 oo Gunnada Keydka Dugsiga ah (School Saving Bonus). Waxaad awood u yeelan doontaa inaad ka gasho nidaamka onlaynka ah.

Adiga ayaa go'aansan kara sida ugu wanaagsan ee loogu isticmaalayo Gunnada Kaydka Dugsiga (School Saving Bonus) baahida qoyskaaga. Waxaad online ka dooran kartaa sida loo qoondeeynayo lacagtaas \$400 ah.

Gunnada waxaa loo isticmaali karaa xagga kharashyada dugsiga 2025, oo ay ku jiraan:

- kaamamka, safarada, tamashlaha iyo soo gelitaanka
- dabaasha iyo barnaamijyada ciyaaraha
- barnaamijyada waxbarashada dibadda
- qalin-jabinta
- dharka dugsiga
- buugaagta waxbarashada.

Gunnada waxa loo isticmaali karaa buugaagta wax-barashada ee la ansixiyay ama dukaamada labbiska ee online ka ama caadi u furan, ama iyada oo loo marayo Gargaarka Dugsiyada Gobolka. Liiska alaabaha iibiya waxaa ku jiri kara dukaanka laga iibsado lebbiska dugsiga ama dukaanka buugaagta. Lacagta inta aad u qoondeeyso buugaagta waxbarashada iyo lebbiska waxay shaqaynaysaa ilaa 30-ka Juun 2025. Kadib waxa loo wareejin doonaa akoonka dugsiga ilmahaaga si markaas loogu isticmaalo hawlaha mustaqbalka.

Dakhliga waxaa la isticmaali karaa sanadaha soo socda haddii aan la wada isticmaalin 2025.

## Qoysaska ay u joogaan in ka badan hal cunig oo u qalma

Qoysaska ay u joogaan in ka badan hal cunig oo isku dugsi dhigta waxay isku dari karaan lacagaha gunnada Kaydka Dugsiga (School Saving Bonus) si ay ugu isticmaalaan hal cunug, ama hawl gaar ah. Marka, tusaale ahaan, qoyska haysta 3 carruur ah oo dhammaantood ah ardayda dugsiyada dawladda waxay heli doonaan taageero qiimihiisu yahay \$1,200 waxayna dooran karaan sida ay u kharashgareeyaan dhaqaalahaas. Gunnada Keydka Dugsiga (School Saving Bonus) ee dugsiyada kala duwan laiskuma wada dari karo.

## Macluumaad dheeraad ah

Si aad wax badan uga ogaato Gunnada Keydka Dugsiga (School Saving Bonus) booqo [vic.gov.au/school-saving-bonus](https://vic.gov.au/school-saving-bonus). Macluumaad la fasiray ayaa sidoo kale laga heli doonaa bogga gunnada kaydinta dugsiga dhawrka toddobaad ee soo socda.